

Isku Xirka Lynnwood Link Connections

Guudmarka Fikradaha Dadwaynaha ee Wajiga 2-aad

Janaayo-Maarso 2023



Fikrad Uruurinta Wajiga 2-aad – Fikradaha Adeegga

La sameeyay Janaayo-Maarsi 2023

Yoolalka

Ujeedada fikir uruurinta Wajiga 2-aad waa in lagu wargeliyo dadwaynaha—ayna ku jiraan dadka gaadiidka ka raaca deegaannada isbadelku saameyay—xog ku saabsan shabakada Fikradaha Adeegga, iyo in fikir laga uruursho sida marinnada fikirka looga xaliyay baahiyaha isku socodka ee muhiimada la siinaayo. Qorshaha shabakada Fikrada Adeegga waxaa ku jira wadooyinka baska ee lasoo jeediyay, ayna naqshadeysay Metro iyo adeegsiga Muhiimada Wajiga 1-aad ee baahiyaha isku socodka, si taageerada ugu haboon loo siiyo dookhyada isku socodka ee aaga mashruuca loogu talagalay. Ayadoo fikrado gaar ah ka helaya Fikradaha Adeegga ee Wajiga 2-aad, Metro waxay wax ka ogaan kartaa baahiyaha bulshada iyo sida ay u faahfaahinayaan soo jeedintooda kama danbaysta ah ee marinnada baska ee fikradaha dadwaynaha ee Wajiga 3-aad.

Isku xirka, wada shaqeynta iyo qiimaynta fikradaha ayaa ku jiray diirada la saaraayo bulshooyinka muhiimada ay siinayso Metro¹, kuwaas oo qayb muhiim ah ka ah aasaaska macaamiisha wakaalada. Agabyada mashruuca iyo 2 xog uruurin ayaa lagu heli karaa 11 luuqadood

Kadib wajiga fikir uruurinta dadwaynaha, Mobility Board (Guddiga Dhaqdhaqaaqa) iyo Partner Review Board (Guddiga Dib-u-eegista Iskaashiga) ayaa gacan ka gaystay in muhiimad dheeri ah la saaro fikradaha bulshada waxayna ka hadleen isku dheelitirka muhiimka ah kuwaasoo loo adeegsan doono abuurista Soo Jeedinta Adeegga Wajiga 3-aad. Kala horeysiinta ahmiyadaha Mobility Board ayaa lagu muujiyay shaxda hoose.

Shaqaalaha Metro ayaa sidoo kale qiimeeyay fikir ku aadan tayada oo laga helay kooxaha bulshada, kulannada tooska ah, faalooyinka loo soo diray Metro ee ka baxsan xog uruurinta, kooxaha diirada iyo kulannada kale. Fikir uruurintaan waxaa lagu dabaqay xaalada bulshada muhiimada la saaraayo, marka la yaqaano.

Bulshooyinka muhiimada la saaraayo waxaa kamid ah xubnaha bulshada ee hela dakhliga qoyska ee dhan \$35,000 ama kayar, qaba nafada, ah soo galootiga ama qaxootiyaasha, ku hadla si gaar ah luuqad aan ahayn Ingiriisi markay guriga joogaan ama isku aqoonsan isir iyo/ama qabiil aan ahayn Cadaanka aan ahayn Hisbaaniga.

Waxa aan ku ogaanay Fikradaha lagu Uruurshay Wajiga 2-aad

Intii lagu jiray Wajiga 2-aad, Metro waxay heshay 3,182 jawaabaha xog uruurinta oo buuxa, iyo 2,330 jawaabood oo dheeraad ah oo kala dhiman. Marka lagasoo tago fikradaha laga dhiibtay xog uruurinta, Metro waxay heshay fikir celin tayada la xiriirta oo ku aadan Fikradaha Adeegga ee Wajiga 2-aad oo lagu baxshay:

- Wacyi gelinta iyo fikradaha laga helay iskaashatada Ururada Bulshada.
- 15 kulan oo lala sameeyay macaamiisha ugu muhiimsan ayna ku jiraan bixiyaasha guryaha qiimaha jaban, xarumaha waxbarashada, kooxaha xaafadaha, goleyaasha magaallada, hogaamiyaasha la doortay iyo kooxaha talo bixinta gaadiidka.
- In ka badan 115 saacadood oo ra'yi uruurin toos ah oo lagu sameeyay goobaha bulshada iyo gaadiidka.
- Sadex kulannada bulshada u furan oo oonlayn ah.
- Faalooyinka qoran ee lagu baxsho iimeelka Metro's HaveASay.

Xulashooyinka xogta aaga ee jawaab bixiyaasha xog uruurinta waxaa ku jira kuwa soo socda.

- 37% ayaa isku aqoonsatay bulshada muhiimada la saaraayo
- 22% ayaa isku aqoonsatay inay naafo yihiin
- 21% ayaa isku aqoonsatay inaysan heli karin gaari
- Jawaab bixiyaasha iyo da'ahooda:
 - Kayar 25 – 10%
 - 25-34 – 18%
 - 35-44 – 18%
 - 45-54 – 14%
 - 55-64 – 12%
 - 65+ – 11%
 - Banaan – 17%
- Inta badan jawaab bixiyaasha ayaa ku nool magaalooyinka soo socda (ayadoo loo kala hormariyay siday u kala jawaabo badan yihiin):
 1. Seattle
 2. Shoreline
 3. Lynnwood
 4. Bothell
 5. Lake Forest Park

Intay qiimaynaysay fikradaha lagu helay xog uruurinta iyo fikradaha tayada ee xog uruurinta bulshada ee kor ku qoran, Metro ayaa aqoonsatay sideed arimood oo muhiim u ah in looga shaqeeyo shabakada fikirka. Meelaha isbadelku ku yar yahay ayaa sidoo kale la ogaaday si loogu daro fikradaha bulshada, gaar ahaana marka laga hadlaayo arimaha ay soo gudbiyeen bulshada muhiimada la saaraayo.

Sideedaan aag ee muhiimka ah, iyo sidoo kale liiska ahmiyadaha Mobility Board, ayaa lagu soo bandhigayaa shaxda hoose.


Muhiimada Guud ee Yareynta Saamaynta waxaa ku jira sadexda arimood ee tiir dhexaadka u ah gaarista go'aanka mashruuca ee sinaanta, ra'yi uruurinta iyo naqshada khadka gaadiidka. **Heerka Khayraadka Loo Baahan Yahay in Xal Loo Helo** ayaa cadeynaaya cadadak saacadaha adeegga gaadiidku u baahan yahay in lagasoo wareejiyo marinnada kale si loo xaliyo cilad kasta.

Dhinacyada Arimaha Muhiimka ah ka jiraan ee lagasoo qaatay Fikradaha Wajiga 2-aad

#	Dhinaca Cilada ka Jirto	Muhiimada Guud ee Yareynta Saamaynta	Heerka Khayraadka Loo Baahan yahay si Loo xaliyo	Heerka Ahmiyada Mobility Board
1	Ka saarida adeegga Lake City Way inta u dhexaysa NE 75th iyo NE 92nd	Sareeya	Dhexdhexaad ah	Sareeya
2	Adeegga Linden Ave oo laga saaraayo 135th	Sareeya	Dhexdhexaad ah	Sareeya
3	Adeegga Meridian Ave oo laga saaraayo dhexda N 130th St iyo 200th St	Dhexdhexaad ah	Sareeya	Hooseeya
4	Adeegga Latona Ave oo laga saaraayo inta u dhexaysa Green Lake Way iyo NE 45th	Hooseeya	Dhexdhexaad ah	Hooseeya
5	Adeegga 5th Ave NE oo laga saaraayo inta u dhexaysa NE 125th iyo NE Northgate Way	Sareeya	Dhexdhexaad ah	Dhexdhexaad ah-Sareeya
6	Isbadelka Route 75 oo aan ku xirmayn Northgate	Hooseeya	Dhexdhexaad ah	Hooseeya
7	Luminta gaadiidka tooska u tagaayay First Hill ee ka imaanaayay waqooyi galbeed King County	Dhexdhexaad ah	Sareeya	Hooseeya-Dhexdhexaad ah
8	Qanaaco daro ku aadan wadada cusub ee Bothell ilaa UW	Dhexdhexaad ah	Sareeya	Hooseeya

Qariirada Aaga Arimaha Muhiimka ah ka jiraan ee lagasoo qaatay Fikradaha Wajiga 2-aad

Lambarada ku qoran lambarada tixraaca qariirada ee shaxda kore.



Horukac

Wajiga 3-aad, oo ah wajiga ugu danbeeyay ee fikir uruurinta bulsho waynta, fikir uruurin ayaa lagu qorsheeyay aagaga gaar ah iyo bulshooyinka deegaannada Soo Jeedinnada Adeegga ay isbadelaan kadib Wajigii 2-aad, iyo sidoo kale aagaga muhiimada sinaanta ee isbadellada la soo jeedshay ay u adeegi karaan wadooyin kaduwan kuwa hadda. Macaamiisha ugu muhiimsan ee Wajiga 2-aad, sida Ururada Bulshada Ku saleysan, bixiyaasha guryaha, xarumaha waxbarashada iyo macaamiisha kale ee muhiimada lagu aqoonsaday, ayaa markale xog laga uruurin doonaa Wajiga 3-aad.

Fikradaha laga uruurshay dadwaynaha ayaa sidoo kale bixin doona fursado ay rakaabka maalin kasta iyo dadka deegaanku ku akhriyaan soo jeedinnada marinka ayna ku baxshaan fikir ku aadan sida soo jeedinta khadka wadadu kor ugu qaadayso ama haddii kale u badelayso dookhyada guud ee isku socodka. Inta badan fikradahaan la uruurinaayo ayaa la filayaa inay ka dhacaan goobaha gaadiidka, xarumaha bulshada, munaasabadaaha maxaliga ah iyo kanaallada kala duwan ee isgaarsiinta.

Haddii aad dooneyso xog dheeraad ah oo lagu baxsho luuqada aad dooneyso, fadlan booqo webseedka Mashruuca Lynnwood Link Connections ([Lynnwood Link Connections - King County Metro Transit](https://www.kingcounty.gov/transportation/lynnwood-link-connections)) ama nagala soo xiriir haveasay@kingcounty.gov

Póngase en contacto con nosotros

Por correo electrónico (en el idioma que prefiera) a: haveasay@kingcounty.gov

联系我们

以电子邮件（以您的首选语言）发送至：haveasay@kingcounty.gov

聯絡我們

通過電子郵件（以您的首選語言）發送至：haveasay@kingcounty.gov

እናን ያግኙን

በሚመርጡት ቋንቋ ይህን ኢሜል ተጠቅመው haveasay@kingcounty.gov ያግኙን

お問い合わせ先

電子メールの宛て先（ご希望の言語で）：haveasay@kingcounty.gov

연락처

이메일 (귀하께서 선호하시는 언어로 보내십시오): haveasay@kingcounty.gov

Свяжитесь с нами

Пишите нам (на удобном вам языке) на адрес электронной почты: haveasay@kingcounty.gov

Nalasoo Xariir

limeel ahaan (luuqada aad doorbido): haveasay@kingcounty.gov

Makipag-ugnayan sa amin

Sa pamamagitan ng email (sa wikang gusto mo) sa: haveasay@kingcounty.gov

Liên hệ với chúng tôi

Qua email (bằng ngôn ngữ của quý vị) tại: haveasay@kingcounty.gov